QORAAL MAGUURTO L. 35/83

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA

XAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO

Rep 1709

UJEEDDO:- KALA GADASHO GURI DAAR AH IYO XUQUUQDA LA XARIIRTA DHULKA DEMANIYAALAHA AH EE GURIGAASI KU DUL DHISAN YAHAY.- - - - - - - -

Muqdishe Maanta ee ay taariikhdu tahay laba iyo toban bisha Feeberayo Sannadka kun sagaal boqol sideedtan iye saddexda(12/2/1983) Xafiiska Notaayaha; ee ku yaalla Waddada Ex Via ROMA, Daarta Uunllaaye, Aniga ee ah Notaaye Dr.CABDI MUUSE MAYOW, ahna Notaaye Muqdishe, waxaa Xafiiskaas iigu yimid Jaalleyaasha hoos ku qoran ee kala ah:- - - - - - - - - - - - -

1)- AAMINA AW CABDI IN SMITH, ku dhalatay Gebiley 19-
Deggan Xamar, ahna Soomaali, leh Passaperyadda lam. 905263 - iye C 373674ENGLANDayna ii sii aqoonsadeen labada Marqaati ee magac yadoodu kala yihiin:-

-CABDULLAAHI AW CABDI AW CUMAR ku dhashay Jigjiga 1919 Deggan Xamar ahna Soomaali, leh W.A.L.57868 XAMAR iye CUSMAAN DIIRIYE RAAGE ku dhashay C/Bur 1944 Deg Xamag leh W.A.L.78661 D.H.ee Muqdishe.- - - - - -

iye JAALLE CABDULLAHI NUUR CADDOku dhashay Kuddur 1949, oo uu ka joogge una saxiixaaye MAXAMUUD NUUR CADDOW ku dhashay XUDUR 1945, Deggan Xamar, lehna - W.A.L.54057 D.H.Xamar.- - - - - - - - - - - - - - - -

Lagu diiwaangeliyay Muqdisho 12/2/83
Xirmo 24
L. 218 gelin 8.976
Lacag dhan Sh. So.
Wakiilka Saxiixay

Dadkaas waxay i weydiisteen inaan u qoro Heshiiskaan ay iigu caddeyeen inta soo socota oo kala ah:- - - - -

1)- Waxaa la hormarinayaa in AAMINA AW CABDI IN SMITH ay gaar ahaan iigu caddeysay inay iska leedahay Guriga daarta ah oo ku yaalla Muqdisho Degmada Hodan kana koobán laba qol oo la jiifto, kuna dul dhisan dhul Demaanyaale ah oo cabbirkiisu yahay 16,50X13,50 sida ku cad Warqadda Milkiyadda Lam 10.528REP ee - 27/1/1969, lagu cashuuray Xamar 24/2/69, L.154, Atti Pubblici, Vol.19, oo uu qoray Notaayo JOSEHP MARIANO laguna soo qoray Buugga Maguurtada ee Maxkamadda - Racfaanka Gobolka Banaadir L.72/1969 ee 4.3.1969;-- in misna JAALLE AAMINA AW CABDI IN SMITH ay ii sii - caddeysay inay Gurigaas kor lagu soo sheegay iyo Xuquuqda la xiirirtaba ka iibisay kuna wareejisay JAALLE CABDULLAHI NUUR CADDOW, oo uu ka Jeeggo uuna saxiixayo Heshiiskaan MAXAMUUD NUUR CADDOW, oo asaguna - Heshiiskaan ku caddeynaaya inuu Gurigaas u aqbalay - uuna gaday Walaalkiisa kor ku qoran:- - - - - - - - -

3)- In labada dhinac ee Gurigaas kala gadatay ay ii caddeyeen in qiimaha Guriga lagu kala gatay uu yahay Sh.So.80.000(Sideetan kun oo shillin) oo kala bax ah kana banaan Deyn iyo rahmadba sida ku cad Nulla Ostada N.119 ee 8/2/83 iyo Nulla Ostada 104 ee 6/2/83 Xamar, oo kala Faraca Cashuuraha Toosan iyo Waaxda

.../...

Cashuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ka soo -
baxay, taariikhaha kor ku kala xusan.- - - - - - - - -
4)- In Gurigaas kor lagu soo sheegay iyo Xuquuqda -
la xiriirta dhulka Demaaniyaalaha ah ee uu ku dhisan
yahay uu Cabbirkeedda Soohdimihiisu kala yihiin:- -
Waqooyi waxa ka xigga AADAN MAGAN, Koofur waxaa ka
xigga Wadde, Galbeed waxaa ka xigga Cabdirasaaq Xaaji
XUSEEN, Barina waxaa ka xiga Wadde, sida ku cad Naq-
shadda L(Progetto N.3853 ee 15/10/66 iyo Warqadda -
Siismada Dhulkaas MWD/727/2719/68 ee 2/12/19 XAMAR;-
5)- in ugu dambaystii ay AAMINA AWCABDI IN SMITH ii
caddeysay inay Gurigaas ku wareejisay Jaallaha gatay
wax ay ku sheegan kartaana aysan jirin milkiyadda
gurigaasina ay u wareegtay JAALLE CABDULLAHI NUUR CAD-
DOW oo qaadan doona wixii Nacfi ah ee gurigaas ka -
yimaada, iskana bixin doona wixii waajibaad ah ee -
gurigaas hadda kadib lagu soo sheegto.- - - - - - -
Wixii aan Meshiiskaan ku qorayn waxaa loo raacyaa
sida sharcigu qabo.- - - - - - - - - - - - - - - - -
Qoraalkaan oo ku qoran hal Xaashi oo laba bog buuxdo
iyo inta ku qoran boggan saddexaad waxaa qoray qof
aan aniga Notaayaha ahi aaminsanahay , waxanaan u aq-
riyey Jaalleyaashaas waxayna ii caddeen inuu ugu qo-
ran tahay siday rabeen waana ila wada saxiixeen.- -
1)- Amna Aw Abdi O M Smith

.../...

2) Maxamud Nuur Caddow

SAXIIXA MARQAATIYAASHA

1)- CABDULLAHI AW CABDI

2)- CUSMAAN DIIRIYE RAAGE Cisman Diiriye

N O T A A Y A H A

(Dr.CABDI MUUSE MAYOW)

12 FEB. 1982

NOTAAYAHA MAGAALADA MUQDISHO

Lam. 820/84-B.G.

TR. 15/10/84 -
16.50 X 13.50 -
Beec Guri
Damanyaale ah